# Kalfadhiga Macluumaadka Provider Hub | Janaayo 2026

Warqaddan kooban waxa ay ka kooban tahay dhammaan xiriirradii (links) lagu wadaagay intii lagu jiray Kalfadhiga Macluumaadka Provider Hub ee khadka tooska ah, kaas oo la qabtay Talaadadii, Janaayo 20, 2026.

Haddii aad qabto su'aalo daba-socod ah, ama haddii aan waqti u helin inaan si toos ah uga jawaabno su'aashaada intii uu socday kulanka, waad ku soo dhawaan kartaa inaad iimayl u dirto kooxda Provider Hub cinwaankan providerhub@state.mn.us.

## Duubis

Duubis ka mid ah kulankan — oo ay ku jiraan su'aalihii ka-qaybgalayaasha iyo jawaabihii ay bixiyeen soo-bandhigayaashu — sidoo kale waa la heli karaa.

**Hel qoraal-hoosaadyo (captions) luqado kale oo aan Ingiriisi ahayn:** YouTube, oo ah goobta lagu martigeliyo duubistan, waxa uu bixiyaa qoraal-hoosaadyo si toos ah loo turjumay (auto-translate) oo loogu talagalay fiidyowyada. Si aad u shiddo adeeggan:

1. Xulo astaanta **Settings** ee ku taalla geeska hoose ee midig ee fiidyowga — waxay u eg tahay qalab wareegsan (gear).
2. Xulo **Subtitles/CC**, ka dibna dooro **Auto-translate**.
3. Xulo **luqadda aad doorbidayso** liiska xulashooyinka.

**Ogaansho:** Marka la adeegsado astaantan, YouTube ayaa si toos ah uga turjumaysa qoraal-hoosaadyada Ingiriisiga luqadda aad dooratay. Dowladda Gobolka Minnesota ma aysan dib u eegin turjumaadahan, mana damaanad qaadi karto saxnimadooda.



*Updated 1/20/2026. Qoraalkan mowduucayada ku jira waa mid hadda jira ee taariikhdan la soo bandhigay. State of Minnesota waxay xaq u leedahay inay cusboonaysiiso ama dib u eegto sida ay markaa u aragto.*
*©2026 State of Minnesota. All Rights Reserved.*

## Xiriirro Lagu Helo Macluumaad Dheeraad ah

- **Bogga Provider Hub** — Waxa uu ka kooban yahay agabyo tababar iyo ilo (resources), warsidaheenna, kalfadhiyadan macluumaadka, warbixinnada sii-daynta (release notes), cusboonaysiinta ku saabsan bilaabista shatiga daryeelka carruurta qoysaska, iyo waxyaabo kale oo badan!
- **Macluumaadka barnaamijyada/siyaasadaha ku saabsan astaamaha hadda (ama dhowaan) ku jiri doona Provider Hub:**
  - Qaybta Shatiyeynta ee Waaxda Carruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska (Department of Children, Youth, and Families — DCYF)
  - Macluumaadka Barnaamijka Child Care Assistance Program ee loogu talagalay bixiyeyaasha daryeelka carruurta
  - Great Start Compensation Support Payment Program
  - Shatiyeynta Early Intensive Developmental and Behavioral Intervention (EIDBI)
- **Hordhaca Provider Hub ee Hay'adaha EIDBI** — Waxaa lagu soo diray iimayl Janaayo 14; waxa uu ka kooban yahay noocyo ku qoran Ingiriisi, español, Soomaali iyo Hmoob
- **Cusboonaysiinta Dayrta 2025 ee Ku Saabsan Bilawga Shatiga Daryeelka Carruurta ee Qoysaska ee Provider Hub (PDF)** — Nooca Ingiriisiga ah waxaa laguu soo diray iimayl Nofeembar 10
- **Provider Hub User Access Learning Library** — Ururin ilo ah oo kaa caawinaya inaad fahanto noocyada kala duwan ee isticmaaleyaasha iyo waxa ay ku qaban karaan aaladda khadka tooska ah
- **Ma tahay isticmaale hadda jira oo u baahan caawimaad la xiriirta Provider Hub?** Gudbi codsi marka aad gasho Provider Hub ama wac 651-431-6075. Koox taageero oo maxalli ah ayaa ka jawaabta codsiyada Isniin ilaa Jimce, inta u dhaxaysa 8:00 subaxnimo ilaa 4:30 galabnimo.



*Updated 1/20/2026. Qoraalkan mowduucayada ku jira waa mid hadda jira ee taariikhdan la soo bandhigay. State of Minnesota waxay xaq u leedahay inay cusboonaysiiso ama dib u eegto sida ay markaa u aragto.*

*©2026 State of Minnesota. All Rights Reserved.*

## Hel Macluumaad Dheeraad ah

Kalfadhiga Macluumaadka Provider Hub ee xiga waxa si ku-meel-gaar ah loo qorsheeyay bisha Maarso. Faahfaahinta — oo ay ku jiraan taariikhda, waqtiga, iyo xiriirka isdiiwaangelinta — waxa lagu dari doonaa warsidaheena bisha Febraayo, sidoo kalena waxa lagu daabici doonaa boggeena.

## Ku Saabsan Provider Hub

Provider Hub waa aalad khadka tooska ah oo loogu talagalay bixiyeyaasha adeegyada bulshada si ay ugu codsadaan uguna maareeyaan shatiyada, maalgelinta, iyo ka-qaybgalka barnaamijyada kale ee dawladda. Provider Hub waxa lagu adeegsan karaa kombiyuutar, tablet, ama taleefan casri ah. Waxa uu ku heli karaa afafka Ingiriisi, Isbaanish, Soomaali, iyo Hmong.

Dowladda Gobolka Minnesota waxay sii waddaa horumarinta aaladda khadka tooska ah iyo dhismaha astaamo cusub. Marka aan sidaas sameyno, bixiyeyaasha badan ayaa heli doona gelitaan. Booqo bogga Provider Hub si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah.



*Updated 1/20/2026. Qoraalkan mowduucayada ku jira waa mid hadda jira ee taariikhdan la soo bandhigay. State of Minnesota waxay xaq u leedahay inay cusboonaysiiso ama dib u eegto sida ay markaa u aragto.*
*©2026 State of Minnesota. All Rights Reserved.*